

JAMHUURIYADA SOMALILAND GOLAHA WAKIILADA

GUDDIDA DHAQAALHA, MAALIYADA IYO GANACSIGA



**Warbixinta Odoroska Misaaniyadda
Qaranka 2022**

January, 2022

HORDHAC:

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiiladu iyagoo gudanaya waajibaadkooda shaqo ee ay Qaranka iyo Gole weynahaba u hayaan, isla markaana ka duulaya awoodahooda iyo Masuuliyadaha uu Xeer-Hoosaadka Goluhu u jideeyey.

Sida Ku Cad **Qodobka 55^{aad} Farq. 1^{aad}** ee Dastuurka Qaranka JSL oo Golahan awood u siinaya ka doodista iyo wax ka bedelka iyo Ansixinta Odoroska Miisaaniyadaha Qaranka ee Xukuumaddu soo gudbis. Guddidu iyada oo Maanka ku haysa Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka ee Xeer Lr.75/2016, Qodobka 4^{aad}, Qodobka 6^{aad} farqadiisa 1,2,3 iyo 4, sidoo kale Qodobka 15^{aad} farqadiisa 1^{aad} xarfaha a,b iyo c.

Sida ku cad Xeerhoosaadka **Golaha Qodobka 61^{aad}**, Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada waxa ay Gole Weynaha u qaabilsantahay isla markaana uga wakiil tahay soo darsida Miisaaniyadda qaranka ee sanadlaha ah iyo arrimaha dhaqaalaha guud ee dalka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Sidaad la socoteen, taariikhdu markay ahayd **27-12-2021** waxa Madaxweynaha JSL, u soo gudbiyey Golaha odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2022-ka, waxaanu Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Mudane **Dr.Sacad cali shire** warbixintiisa sanadlaha ah ee ku saabsan Miisaaniyadda Qaranka ka jeediyay Golaha hortiiisa isla maalintaa **27-12-2021**. Intaa ka kadib shir-gudoonku wuxu ku wareejiyey Guddida si ay waajibaadkooda shaqo uga gutaan iyada oo Guddidu Gacanta ku haysay Miisaaniyadda muddo ka badan labbo isbuuc oo Guddidu Galin hore, galin dambe iyo habeenba ay shaqaynaysay.

Guddidu iyadoo ka dheregsan Xaaladaha guud ee dalka si gaar ahna isha ugu haysa dhinacyada dhaqaalaha iyo Siyaasadda waxay la kulantay Dhammaan daneeyayaasha

Miisaaniyadda Qaranka intii ay ka gaadhi karayaan iyaga oo sidoo kalena dhagaystay cabashooyin iyo talo bixino kala duwan. Sidoo kale, Guddidu waxa ay maanka ku haysay kana shidaal qaadanaysay warbixintii safarkoodii ay kusoo mareen guud ahaan dalka.

Faahfaahinta Miisaaniyadda Qaranka 2022:

Guudmarka Miisaaniyadda 2022

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Miisaaniyaddu waa halbowlaha kala socodsiiya hawlaha qaranka taas oo laga dheehan karo, badqabka dhaqaale, siyaasadeed, mudnaanaha iyo qorshayaasha Dawladda muddo cayiman oo sanad ah. Sidaynu wada ogsoonahay baahiyaha iyo Haynta ama dakhliga ina soo gala aad bay u kala badan yihiin, sidaa awgeed, waa in aynu awoodda saarnaa sida ugu fiican ee aynu isugu dheeli tiri karno baahida iyo kolba dakhliga la hayo.

Odoroska Miisaaniyadd sannadeedka 2022-ka wuxu ka kooban yahay:

1. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe,
2. Miisaaniyadda Dawladaha Hoose iyo Hay'addaha Madaxa Bannan,
3. Miisaaniyadda Sanduuqa horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeq bixiyeyaashu (**Somaliland Development fund**),
4. Miisaaniyadda Mashruuca Maamul Daadejinta Dawladda Hoose (**JPLG**),
5. Miisaaniyadda Mashaariicaha Baanka Adduunka (**PFM, DRM, CSSP, SEAP**),
6. Mashruuca Maamulka khatarta Dabiiciga ah iyo Cuntada (**GIZ**) ee Dowladda Jamhuuriyadda federaalka Germalku hirgalindoonto.
7. Mashruuca (**ILED**).

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Miisaaniyaddani waa Miisaaniyaddii **31aad ee** Qaranka Somaliland yeesho, Isugeynta guud ee Miisaaniyadda sannadka 2022 waa **3,447,802,505,538 SLSH**. Miisaaniyadda Dawladda dhexe waa **2,410,452,894,335 SL.sh**, taas oo ka badan tii hore **243,452,429,535 slsh** una dhiganta **11.2%**. Halka Misaaniyadda Dowladdaha hoose ay noqonayso **528,878,259,786 Sl.sh**, sidoo kale Misaaniyadda Haay'adda Madaxa bannaan ay tahay **276,986,730,707 SLSH**.

Ku tallogalka Odorosyadda iyo Dakhliga Dowladda

Dowladdu waxay sannadihii u dambeeyay si joogto ah u horumarinaysay uruurinta dakhliga iyo kharash-galka. Ururinta dakhliga dhabta ah iyo kharashaadka dowladda ayaa si joogto ah u kordhayay sanadba sanadka uu ka dambeeyey. Iyadoo aynu maanka ku hayno in labadii sanno ee u danbeeyay uu jiray dakhli dheeri ah (**Surplus**).

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal

Guddidu iyada oo dareensan in Misaaniyaddan 2022-ka ay ku jirto dakhli ka badan kii sannadkii hore oo dhan **15%**, sidoo kalena ka dheregsan xaaladda dhaqaale ee wadanku ku jiro, sida abaaraha, qiimaha quutal daruuriga oo kacay, Xanuunka Saf Marka ah ee Covid-19 oo mawjaddo cusubi adduunkii ka dilaaceen iyo Guud ahaan baahiyaha ka jira Gobolada dalka. Korodhka dakhli qodobada sababta u ah waxa ka mida:

1. Korodhka dhoofka xoolaha oo la rajaynayo inuu kor u kici doono Sannadka 2022 marka la barbar dhigo sanadka 2021. Saamaynta safmarka Covid 19 oo keentay in Xajka la joojiyo Sannadkan 2021 taas oo hoosu dhigtay dhaqalaha guud ee dalka.

2. Cashuuraha an tooska ahayn ee Badeecada soo dega iyo Cashuuraha saaran Badeecadaha iyo Adeega (GST); kor u kaca Badeecadaha soo dega iyo Fulinta siyaasada GST ayaa la filaya iyana in dakhli badan ka soo xeroodo Sannadka 2022.

Goobaha uu dakhligu kasoo xeroon doono

Dakhliga Guud ee Dowladda wuxu ka iman doonaa **77%** kastamada, halka Cashuuraha Beriga ka iman doono **20%**, waxa kale dakhli kasoo xeroon doona Wasaaraddaha iyo haayada Dowladda **3%** beriga sida shaxda hoose idinka muuqata:

Shaxda Goobaha dakhligu ka iman doono

Ilaha dakhli	Dakhli	Percentage (%)
Kastamka	1,856,749,059,977	77%
Cashuuraha Beriga	488,218,301,227	20%
Wasaaraddaha iyo Hay'addaha kale (ilo kale)	65,485,533,330	3%
Total	2,410,452,894,534	100%

Faahfaahinta Meelaha Mudnaanta la siiyay (Kharash) ee sannadka 2022

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Guddida iyada oo ka duulaysa qorshayaasha qaranka u yaala waxa uga soo baxay meelo cayiman oo mudnaan (Kharash) Guud iyo mid gaara la siiyay, sida shaxdan hoose idinka **muuqata saamiga**

kharashka Guud ee Mudnaanta la siiyay sannadka 2022:

Wadaagaha	Miisaaniyadda 2021	Miisaaniyadda 2022	faraqa	Saamiga Miis Guud (%)
Amniga iyo Difaaca	758,369,698,089	860,210,281,946	101,840,583,857	35.69%
Maamulka	426,365,451,126	465,742,694,562	40,377,243,436	19.32%
Dhaqaalaha	355,348,110,659	334,727,745,337	-20,620,365,322	13.89%
Waxbarashada	194,115,414,259	207,834,914,751	13,719,500,492	8.62%
Caafimaadka	111,300,137,614	147,156,537,981	35,856,400,367	6.10%
Kaabayaasha Dhaqaale	98,988,175,871	116,287,229,533	17,299,053,662	4.82%
Qaybaha kale	100,225,450,715	116,581,581,638	16,356,130,923	4.84%
Wax-Soosaarka	55,829,925,153	62,825,604,564	6,995,679,411	2.61%
Deegaanka	29,327,559,871	35,226,072,948	5,898,513,077	1.46%
Biyaha iyo Fayo-Dhowrka	24,355,825,232	47,346,196,061	22,990,370,829	1.96%
Tamarta	13,774,716,211	16,514,035,014	2,739,318,803	0.69%
Wadarta	2,167,000,464,800	2,410,452,894,335	243,452,429,535	100%

Waxa sidoo kale, xusid mudan in meelo mudnaan gaara la siiyay taas oo aad ka dheehan kartaan Siyaasadda ay ku dhisan tahay Misaaniyaddu, kuwaas oo kala ah:

1. Ciidamada Qaranka oo sannadkan loo kordhiyay Mushaharkoodii
2. **10%** Cashuur Dhimista Raashinka Qutul Daruuriga ah.
3. Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo saarka gudaha.
4. Sii waddida Mashruuca Shaqo Qaran.
5. Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.
6. Abuuridda Sanduuqa wax ka qabashada Xanuunka Covid-19, iyo ku darista Miisaaniyadda Dakhliga ka soo xerooda Covid-19.
7. Diyaarinta Aagga loogu talo galay Warshadaha (**industrial Zone**).
8. Isku dheeli tirka dakhli iyo kharashka.
9. Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud.
10. Iyo Hirgalin dhamaan qaybaha kala duwan ee Nidaam Xisaabeeda iswada ee (**SLFMIS**) iyo kuwo kale.

Misaaniyadda Dowladdaha Hoose iyo Hay'addaha Madaxa Bannaan

Mudane Guddoomiye, Shir-guddoon iyo Mudanayaal: shaxdan hoose waxa idinka muuqata Misaaniyadda Ha'yaddaha Madaxa Bannaan 2021 iyo 2022:

[Shaxda Misaaniyadda Haa'yadaha Madaxa Banaan ee 2022:](#)

	<i>Hay'adda</i>	<i>Mis 2021</i>	<i>Mis 2022</i>	<i>Difference</i>	<i>%</i>
1	Dekeda Berbera	33,371,121,000	45,302,594,500	11,931,473,500	36%
2	Baanka Dhexe	52,977,625,440	48,028,286,752	(4,949,338,688)	-9%
3	Haamaha Shidaalka Berbera	34,621,223,000	47,996,950,000	13,375,727,000	39%
4	Madbacada Qaranka	39,661,669,400	41,161,669,400	1,500,000,000	4%
5	Wakaalada Biyaha Gabiley	4,087,247,060	4,107,247,060	20,000,000	0%
6	Wakaalada Biyaha Hargeysa	40,550,000,000	38,113,500,000	(2,436,500,000)	-6%
7	Wakaalada Biyaha Burco	19,129,200,000	22,187,415,000	3,058,215,000	16%
8	Wakaalada Biyaha Berbera	8,544,165,000	9,577,143,000	1,032,978,000	12%
9	Wakaalada Biyaha Borama	14,047,344,675	17,769,338,995	3,721,994,320	26%
10	Wakaalada Biyaha Arabsiyo	794,987,500	839,820,000	44,832,500	5.6%
11	Wakaalada Biyaha Wajaale	-	1,902,766,000	1,902,766,000	100
	Total	247,784,583,075 /=	276,986,730,707/=	28,362,327,632 /=	11%

Shaxdan hoose waxa idinka muuqda Misaaniyadda Dowladdaha Hoose ee 2022:

NO	DISTRICT NAME	MIS 2021	MIS 2022	DIFFERENCE	%
1	HARGEISA	98,679,100,000	154,762,185,093	56,083,085,093	57%
2	BURCO	27,503,899,724	45,413,176,592	17,909,276,868	65%
3	BORAMA	20,732,000,000	37,751,000,000	17,019,000,000	82%
4	GABILEY	39,196,324,720	45,083,600,000	5,887,275,280	15%
5	BERBERA	105,776,836,278	117,179,194,873	11,402,358,595	11%
6	CEERI-GAABO	10,393,000,000	12,020,000,000	1,627,000,000	16%
7	LAAS-CAANOOD	15,519,222,000	18,941,599,000	3,422,377,000	22%
8	SEYLAC	12,222,293,416	15,974,058,812	3,751,765,396	31%
9	SHEEKH	4,584,940,000	7,036,062,500	2,451,122,500	53%
10	TALEEX	-	2,292,000,000	2,292,000,000	100%
11	SALAXLAY	2,700,000,000	4,400,000,000	1,700,000,000	63%
12	BALIGUBADLE	2,198,398,000	5,821,884,000	3,623,486,000	165%
13	LUG-HAYA	-	3,360,000,000	3,360,000,000	100%
14	BAKI	1,446,850,000	3,825,520,000	2,378,670,000	164%
15	XUDUN	-	2,292,000,000	2,292,000,000	100%
16	CEEL-AFWEYN	1,133,000,000	3,393,388,000	2,260,388,000	200%
17	OODWEYNE	7,198,000,000	10,382,500,000	3,184,500,000	44%
18	CAYNABO	3,247,000,000	4,547,675,916	1,300,675,916	40%
19	GAR-ADAG	1,047,000,000	2,819,400,000	1,772,400,000	169%
20	BADHAN	-	3,200,000,000	3,200,000,000	100%
21	DHAHAR	-	2,292,000,000	2,292,000,000	100%
22	LAAS-QORAY	-	2,292,000,000	2,292,000,000	100%
23	BUUHOODLE	-	3,208,000,000	3,208,000,000	100%
24	QORYAALE	-	761,900,000	761,900,000	100%
25	FARA-WEYNE	1,505,941,000	-	{1,505,941,000}	-100%
26	DURUQSI	444,000,000	444,000,000	-	0%
27	ALLAY-BADAY	756,907,000	1,511,130,000	754,223,000	100%
28	ARABSIYO	976,605,000	1,291,105,000	314,500,000	32%
29	BULLO-XAAR	775,000,000	-	{775,000,000}	-100%
30	XAGAL	388,200,000	398,200,000	10,000,000	3%
31	XASAN-GEELE	574,000,000	-	{574,000,000}	-100%
32	BALI-MATAAN	-	300,000,000	300,000,000	100%
33	LAAS-CIIDLE	-	200,000,000	200,000,000	100%
34	AGABAR	-	240,000,000	240,000,000	100%
35	SABA-WANAAG	-	1,527,910,000	1,527,910,000	100%
36	LAAS-GEEL	-	532,635,000	532,635,000	100%
37	CADAADLEY	700,000,000	700,000,000	-	0%
38	XAAJI SAALAX	-	382,000,000	382,000,000	100%
39	HARA-SHEEKH	-	300,000,000	300,000,000	100%
40	WAJAALE	8,304,051,000	8,970,589,000	666,538,000	8%
41	DACARTA	-	408,575,000	408,575,000	100%
42	DAARASALAAM	-	1,064,700,000	1,064,700,000	100%
	TOTAL	368,002,568,138/=	528,878,259,786/=	160,875,691,648/=	44%

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Muddadii ay Guddidu ku jirtay kasoo tallo bixinta Odoroska Miisaaniyadda 2022, waxa ay mudnaanta kowaad siisay dib u eegista Lifaaqii hore ee Goluhu ku ansixiyey Miisaniyaddii 2021-ka, si ay u xaqiijiso wixii ka fuley Go'aamadaas iyo waxaan ka fulin, Go'aanadaasina waxa ay kala ahaayeen sidan;

1. Waa In Wasaaradda Horumarinta maaliyaddu ay daraasad dhamaystiran ka samayso sidii kor loogu qaadi lahaa Dakhliga cashuuraha barriga isla markaana looga guuri lahaa dakhligan ku tiirsan kastamadda dalka iyadoo in ka badan 78% dakhliga Miisaniyaddeenu uu kasoo xeroodo kastamadda dalka iyadoo aynu maanka ku hayno xaaladdaha amni iyo isbedelada ka socda mandiqadda aynu ku noolnahay.
2. Waa in Dawladdaha Hoose ay hirgaliyaan nidaamka casriga ah ee maamulka Maaliyadda laguna bilaabo **11-ka** degmo ee mashruuca Maamul daadejinta ka hanaqaaday sanadkan 2021, iyada oo kuwa kalena loo gudbi doono sanaddaha soo socda.
3. Waa in golaha la hor keeno xeerka lagu Maamulaayo lacagta **Electronic-ga ah ee (Electronic Money Management Act)**, iyada oo baahi weyn uu u qabo Guud ahaan Qarankani gaar ahaana Hay'addaha Bahda Dhaqaalaha iyo Maaliyadda.
4. Waa In Hay'addaha aan lahayn xeerka lagu dhisay oo muujinayaa Waajibaadkooda iyo Masuuliyadooda kuna jira Miisaniyadda dowlada dhexe iyo haayadaha madaxa banaan ee 2021, ka hor miisaaniyada 2022-ka ay xukuumadu soo samayso xeerarkooda isla markaana ay golyaasha sharci dajinta hor keento, kuwaas oo kala ah (**Gudidda Dib u habayn shuruucda, Diwaanka**

Sakada, Ciidanka Dabdamiska, madbacada qaranka iyo haamaha kaydka shidaalka JSI).

5. Waa in laga saaro liifaqa wax ka bedelka Xeerka Dakhliga ee ku lifaaqan Odoroska Miisaniyadda 2021, oo si gaar ah xeerkaas waxka badalkiisa golaha loogu soo gudbiyo.
6. Waa in lagu daraa Odoroska Miisaniyadda 2022-ka gunnada sagootiska Xildhibaanada hore ee Golaha sida ku cad Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, M/kuxigeenka iyo Golayaasha Sharci dejinta
7. Si loo helo Miisaaniyad dhammaystiran oo faahfaahsan, waa In lagu soo daro Miisaaniyadda sannadka soo socda Mashaaricaha horumarineed ee ka maqan Miisaniyad Sanadeedka 2021-ka ee deeq bixiyayaashu bixiyaa

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Guddida Waxaa usoo baxay in Go'aanadii Golaha Wakiilada Jsl ee ku lifaaqnaa Miisaaniyaddii 2021-ka, laga fuliyay (2) qodob, halka hal qodob isna wax laga fuliyey walina shaqadiisu socoto, sidoo kale afar (4) qodob aan waxba laga fulin, waxaana ka mida qobada la fuliyay:

1. In laga saaro liifaqa wax ka bedelka Xeerka Dakhliga ee ku lifaaqan Odoroska Miisaniyadda 2021, oo si gaar ah xeerkaas waxka badalkiisa Golaha loogu soo gudbiyo.
2. Waa in lagu daraa Odoroska Miisaniyadda 2021-ka gunada, sagootiska Xildhibaanada Baarlamaanka ee ku cad xeerka maamuuska madaxweynaha, M/kuxigeenka iyo Golayaasha sharci dejinta.
3. Si loo helo Miisaaniyad dhamaystiran, waa in lagu soo daraa Mashaaricda Horumarineed ee ka maqan Miisaniyadda ee ay deeq bixiyayaashu bixiyaan, qodobkana qayb baa fushay iyada oo Sanadkan Miisaniyadda

2022-ka lagu soo daray labo mashruuc oo cusub oo kala ah Mashruuca Maamulka khatarta Dabiiciga ah iyo Cuntada (**GIZ**) oo Dowladda Jamhuuriyadda federaalka Germalku hirgalindoonto; iyo Mashruuca labbaad oo isna ah (Inclusive Local and Economic Development, I.L.E.D) oo ay maalgalisayno Midawga Yurub.

Qodobada aan wali waxba ka fulin:

1. Waa In Wasaaradda Horumarinta maaliyaddu ay daraasad dhamaystiran ka samayso sidii kor loogu qaadi lahaa Dakhliga cashuuraha barriga isla markaana looga guuri lahaa dakhligan ku tiirsan kastamadda dalka iyadoo in ka badan 78% dakhliga Miisaniyaddeenu uu kasoo xeroodo kastamadda dalka iyadoo aynu maanka ku hayno xaaladdaha amni iyo isbedelada ka socda mandiqadda aynu ku noolnahay.
2. Waa in Dawladdaha Hoose ay hirgaliyaan nidaamka casriga ah ee maamulka Maaliyadda laguna bilaabo **11-ka** degmo ee mashruuca Maamul daadejinta ka hanaqaaday sanadkan 2021, iyada oo kuwa kalena loo gudbi doono sanaddaha soo socda.
3. Waa in golaha la hor keeno xeerka lagu Maamulaayo lacagta **Electronic-ga ah ee (Electronic Money Management Act)**, iyada oo baahi weyn uu u qabo Guud ahaan Qarankani gaar ahaana Hay'addaha Bahda Dhaqaalaha iyo Maaliyadda.
4. Waa In Hay'addaha aan lahayn xeerka lagu dhisay oo muujinayaa Waajibaadkooda iyo Masuuliyadooda kuna jira Miisaniyadda dowlada dhexe iyo haayadaha madaxa banaan ee 2021, ka hor miisaaniyada 2022-ka ay xukuumadu soo samayso xeerarkooda isla markaana ay golayaasha sharci dajinta hor keento, kuwaas oo kala ah (**Gudidda Dib u habayn shuruucda, Diwaanka**

Sakada, Ciidanka Dabdamiska, madbacada qaranka iyo haamaha kaydka shidaalka JSL).

Guddidu waxa ay Wasaaradda Maaliyadda ku Bogaadinaysaa Qodobaddaas wixii ka fulay, sidoo kale waxay mar kale soo jeedinaysaa in wixii fuli waayey la fuliyo Sanadkan.

Go'aanada Guddida ee Odoroska Miisaniyadda 2022

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu, ka dib marka ay daristay, Odoroska Miisaniyadda 2022-ka, isla markaana ay dul istaagtay dhammaan qaybaha kala duwan ee Miisaniyaddu ka koobantahay, sidoo kale la kulantay dhawr jeer Wasiirka Horumarinta Maaliyadda iyo madaxda kale ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dawladda, sidoo kale, la fadhiisatay lana kulantay dhammaan cid kasta oo ay Guddidu u arkaysay in ay lagama maarmaan u tahay Miisaniyadda 2022-ka, sidoo kale dhagaysatay talo soojeedimaha iyo cabashooyinka kala duwan ee la xidhiidha Miisaniyadda, waxa ay Gole waynaha si sharafle ugu soo jeedinaysaa Go'aamadan: -

1. Waa in Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu 2%-ka horumarinta gobolada Barri ay kusoo dhamaystirto Miisaniyadda 2023-ka isla markaana ay soo mashaariicayso 70%
2. Waa in Miisaniyadda Dawladdaha Hoose iyo Hay'addaha Madaxa banaan dib u eegis lagu sameeyo isla markaana loo diyaariyo hannanka casriga ah (**Standard Charts Accounts**) si kor loogu qaado daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.
3. Waa in Dhammaan Haay'addaha aan haysan Xeer lagu Aass-aas oo Golayaashu ansixiyeen isla markaana hela qoondo Miisaniyadeed sida (Ciidanka Dab-damiska,

Hay'adda Cilmi baadhista Beeraha, Madbacada Qaranka, Haamaha Shidaalka ay Golaha ku hor keenaan muddo lix bilood Gudahood.

4. Waa in Misaaniyadda 2023-ka lagu soo daraa Dakhliga iyo kharashaadka Hay'addaha aan ku jirin Misaaniyadda si loo helo Miisaniyad dhamaystiran.
5. Waa in lays waafajiyo, la daa-dajiyo, lana gaadhsiiyo dhamaan Dowladdaha hoose ee degmooyinka dalka oo Misaaniyadda lagu soo dhamaystiro qoondada kabka 12.5%, loona raaco Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka **23/2019**.
6. Waa in Kaalmadda Miisaniyadda ee Dugsiyadda la siiyo loogu qaybiyo tirada Ardayda.
7. Waa in Wakaaladdaha Biyaha iyo Hay'addaha Madaxa Bannaan Maamulka Maaliyaddooda iyo habka bixinta Qandaraasyadda lagu sammeeyo Maamul toosin lana waafajiyo Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Maaliyadda iyo habraaca Qandaraasyadda Qaranka.
8. Madama Qaabdhismeedka Komishanka Tamarta aanu Waafaqsanayn Xeerka Tamarta Qaranka ee **Lr.81/2018** waa in Muddo Lixbilood ah uu ku Saxaa Madaxweynuhu Qaab dhismeedka Komishanka Tamarta Qaranka.
9. Waa in Kaalmadda la siiyo Kooxaha Fannaninta Qaranka ay si siman ugu qaybiso Wasaaradda Warfaafinta Qaranku.
10. Waa in Diyaarinta iyo soo gudbinta Miisaniyadda loo raaco Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka Xeer **Lr.75/2016** iyada oo la sugaayo muddada Golaha loo soo gudbinaayo sida ku qoran Xeerka.
11. Waa in Sanadka 2022-ka Dawladda Hoose ee Gabiley ay isticmaasho Miisaaniyaddii hore 2021, dakhliga dheeraadka ah ee soo baxana waa in la mashaariceeyo isla markaana laga ansixiyo Gola Degaanka ee Degmadda.
12. In Miisaniyadda 2023-ka loo kordhiyo Mushaharka Macalimiinta iyo bahda Caafimaadka

13. In qoondooyinka (Accounts) Kaydadka Qaranka ee ku jira Miisaniyadda Qaranka ay Wasaaraddu usoo gudbis Golaha Wakiilada hadhaaga ku jira Sanad Miisaniyadeed kasta
14. In Sanad Miisaniyadeed Kasta ay Wasaaraddu soo gudbis Xogta Daymaha Qaranka
15. In Wasaaraddu soo Gudbis sanad Miisaniyadeed kasta Warbixinta Faa'idadda iyo kharaasaha Mashaarica Maalgalined ee Dawladdu ku jirto
16. In Magacyadda Wasaaraddaha iyo Hay'addaha ku jira Miisaniyadda loo raaco sida uu dhigaayo Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxa bannaan ee Xeer Lr.71/2015
17. In Dawladdu xooga saarto isla markaana dhiiri galiso Wax soo saarka Gudaha.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Soo jeedinta **18aad** ee Guddidu waxa ay ka koobantahay madaxyo ay Guddidu wax ka jartay iyo madaxyo ama Qaybo ay Guddidu wax u kordhisay kuwaas oo ay Guddidu lagama maar maan u aragtay;

MADAXYADDA WAX LAGA JARAY			
Qaybaha Kharashyadda	Miisaniyadda 2022	Percent	L.lajaray SLSH
Kharashka Alaabta iyo Adeega	443,191,323,338	5.5%	24,375,522,784
Kharashka Lama Filaanka	63,157,500,000	20%	12,631,500,000
Iibsiga Saamiga Fiber Opticts	14,000,000,000	50%	7,000,000,000
Sanduuqa Aqoonsi Raadinta korodhka 2022 oo dhama 40%	7,900,000,000	50%	3,950,000,000
Kharashaadka kale	56,260,298,315	20%	11,252,059,663
Total			59,209,082,447

**MADAXYADDA/QAYBAHA WAX LAGU
KORDHIYEY**

Hay'addaha	Miisaniyadda	Korodh	L. Kordhiyey SLSH
Mushaharka Ciidamadda	386,861,682,320	10%	38,686,168,232
Mashruuca Doorashooyinka Doorashada		7,000,000,000	7,000,000,000
Guddida Tacliinta Sare		437,000,000	437,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska Mushahar Shaqaalaha ku-meel gaadhka ah oo dhan (100)		1,000,000,000	1,000,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo sayniska (Xarunta Agoomaha Hargaysa)		200,000,000	200,000,000
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska (Kaalmadda Xarunta Ubad Gar- Gaar)		167,000,000	167,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska (Kaalmadda Ururka Naafadda ee SDHO)		500,000,000	500,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska (Kaalmadda Ururka Agoomaha Taban Taabo)		200,000,000	200,000,000
Wasaaradda Shaqo-Galinta ,Arrimaha Bulshada iyo Qoyska (Kaalmadda Ururka Adams Academy)		300,000,000	300,000,000
Wasaaradda Horumarinta Biyaha (Mashruuca Biyo ballaadhinta Ceerigaabo)		2,800,000,000	2,800,000,000

Wasaaradda Horumarinta Biyaha (Kaydka Biyaha Burco)		2,800,000,000	2,800,000,000
Wasaaradda H.Caafimaadka Mushaharka Shaqaalaha ku-meel gaadhka ee Caafimaadka oo dhan (200)		2,000,000,000	2,000,000,000
Wasaaradda H.Caafimaadka (Dhismaha Cisbitaalka TB ee Borama)		1,400,000,000	1,400,000,000
Wasaaradda Gadiidka iyo H.Jidadka (Dhismaha Waddada Baki)		1,400,000,000	1,400,000,000
Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta (Kaalmadda Guddida Wanaag Farinta)		318,914,214	318,914,214
Total			59,209,082,446

Gabogabo:

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal,

Guud ahaan Guddidu waxa ay u mahad-celinaysaa, Masuuliyiintii kala duwanaa ee ay la kulantay, kuwaas oo dhammaantood si hufnaan iyo mas'uuliyaddi ku dheehantahay Guddida ula wadaagay macluumaadkii iyo xogihii kala duwanaa ee ay Guddidu uga baahnayd, sidoo kale Guddidu waxa ay u mahadcelinaysaa, qaybihii kala duwanaa ee ka midka ahaa Bulshada Rayidka iyo Aqoonyahankii kala duwanaa ee Guddida la wadaagay talooyinka wax ku oolka ah, si gaar ah Guddidu waxa ay ugu mahadcelinaysaa Mudanayaasha Golaha Wakiilada oo runtii muddadii ay Guddidu Miisaniyadda Gacanta ku haysay si hagar la'aan ah ugu soo gudbinayaayey tallooyinkooda iyo aragtiyahooda, sidaa si la mid ah, Guddidu waxa ay mahadcelin ballaadhan u jeedinaysaa Guddida Hawlaha Golaha (Business Committee) iyo Shir-guddoonka sharafta leh ee Golaha oo

Guddidu marar kala duwan kulamo la qaadatay isla markaana dhagaystay tallooyinkoodana ku salleeeyey Go'aanka Guddida ee idin horyaala, ugu dambayn Guddidu waxa ay hambalyeynaysaa, bogaadinaysaa una mahadcelinaysaa Madaxda Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo runtii si xilkasnimo leh Guddida ula shaqeeyey Muddadii ay Guddidu Gacanta ku haysay kasoo talo bixinta Miisaniyadda 2022-ka.

Gabo-gabadii, Muddanayaal waxaad ka war haysaan in dalka ay ka jirto duruufo kala duwan oo runtii taabanaysa nolasha shacabkii ina soo doortay, duruufahaas oo ay ugu mudan yihiin, Xanuunka saf-marka ah ee Covid-19 oo uu Adduunku galay mawjad horleh, Xaalad abaareed oo guud ahaan ka jira dalka, Maciishadii oo kor u kacday guud ahaan adduunka inaguna aynu la qabno iyo guud ahaan xaalado dhaqan dhaqaale oo ka jira Somaliland.

Sidoo kale, waxaad ka warqabtaan Mudanayaal, in Miisaniyaddani ay dib u dhac weyni ku yimi iyada oo ay ahayd in la ansixiyo ka hor 31-kii bishii December 2021-ka, maantana ay tahay 15/01/2022, Iyada oo aynu ognahay guud ahaan duruufahaas aynu kor ku soo sheegnay ay Miisaniyaddu wax ka qabanayso balse ay u baahantahay in aynu Ansixino oo haddii aynu wakhti ka badan intaa aynu haysano dib u dhacaasi keeni karo in guud ahaan Qaranku galo xaalad murugsan.

Sidaa darteed Mudanayaal, Anagoo ka Guddi ahaan kasoo baaraan degnay wakhti iyo tacab badana galinay, waxaanu Gole weynaha Sharafta leh ka codsanaynaa in odoroska Miisaniyadda 2022-ka lagu ansixiyo Lifaafa Guddida.